



Ilmahaaga dhallaanka ah ka difaac caabuqyada sida faayraska RS iyo hargabka xiiq dheerta

Carruurta dhallaanka ah (carruur ka yar 1 sano) si halis ah ayay ugu bukoon karaan qaar ka mid ah faayrasyada iyo baakteeriyada. Carruurta aadka u yar ayaa ugu nugulsan. Waa kuwan dhowr talooyin ah oo ku aaddan sida carruurta dhallaanka ah looga difaacayo faafinta cudurrada ee ku faafa dhinaca hawada.

La kulan dad caafimaad qaba oo keliya

Dadka la kulmaya ilmaha dhallaanka ah waa in ay caafimaad qabaan. Iskailaali inaad la kulantid dad ka baxsan qoyska oo leh qufac ama diif. Waxaa sidoo kale muhiim ah in dhammaan dadka gacanta ku qabanaya iyo kuwa la kulmaya ilmaha ay aad u ilaaliyaan nadaafadda gacmaha, micnihii inay gacmaha ku dhaqaan saabuun iyo biyo ama isticmaalaan dareeraha gacmaha ee infakshanyada ka hortaga (alkoosha gacmaha).

Haddii ay suurtagal tahay, ka ilaali in ilmuhu wakhti dheer joogo meelo dhisme gudihis ah oo iyadoo ciriiri ah ay dad badan ku kulmayaan inta lagu jiro xilliga deyrta iyo jiilaalka. Sidaas ayaa badanaaba faafitaanka weyn oo faayraska ahi ka dhacaa gudaha bulshada.

Naas nuuji haddii ay suurtagal tahay, sababtoo ah naas nuujintu waxay yaraysaa khatarta dhinaca caabuqyada marinnada neefta. Iska ilaali in ilmaha ay dhib ka soo gaarto qiiqa tobaakada.

Faayraska RS – ma la hayo talaal loogu talagalay carruurta laakiin qaarkood waxay heli karaan dawo ka hortagta

Faayras halis ku ah carruurta dhallaanka waa faayraska-RS. Wuxuu jiraa badanaaba wakhtiga deyrta iyo jiilaalka. Ilmaha waxaa ku dhici karta qandho, dhibaato neefsiga ah oo mararka qaarkood waxaa ku adkaan karta in la awoodo wax cunidda. Sanad walba carruur badan ayaa u baahata in lagu daryeelo isbitaal dhanka dhibaataada dhanka neefsashada iyo cuntada sababtoo ah faayraska RS.

Weli ma jiro talaal ka hortagga faayraska RS oo la siiyo carruurta. Laakiin carruurta dhallaanka ah ee khatar weyn ugu jira inay si halis ah u bukoodaan waxay heli karaan dawo ka hortag ah inta lagu jiro xilliga faayraskan badanyahay. Waxaa jira talooyin qaran kuna saabsan kuwa ay yihiin carruurta ay taasi khuseyso.

Xiiq dheerta – talaal waa loo hayaan haweenka uurka leh iyo carruurta dhallaanka ah

Baakteeriyada xiiq dheerta waxay badanaaba faaftaa xilliga ugu dambeeya ee wakhtiga xagaaga iyo deyrta oo xanuun halis ah ayay ku keeni kartaa carruurta dhallaanka ah. Qufac wakhti dheer socda, dhibaato neefsashada ah oo halis ah iyo ku adkaansho in wax la cuno waxay keeni kartaa in ilmuhu u baahdo in lagu daryeelo isbitaal.

Haddii aad uur leedahay waxaa lagugu talinayaa inaad iska talaasho ka hortagga xiiq dheerta si aad uga difaacdo naftaada iyo ta ilmaha dhallaanka ah in laga hortago cudurkan. Marka ilmuhu jiro 3 bilood ayaa lagu casuumaa talaalka ka hortagga xiiq dheerta ee dhanka xarunta caafimaadka carruurta, XCC.

Talaalada lagu bixiyo XCC waa bilaash oo qofka ayaa dooran kara

Carruurta oo dhan waxaa lagu casuumaa difaaca ka hortagga dhowr cudur oo halis ah iyadoo loo marayo talaalada dhanka XCC. Talaalada ku jira barnaamijka talaalka carruurta ee Iswiidhan waa bilaash oo qofka ayaa dooran kara. Talaalka ugu horeeyaa wuxuu bixiyaa difaaca ka hortagga calool xanuunka oo waxaa la bixiyaa isagoo ah dhibco afka lagu shubo marka ilmuhu yahay 6 toddobaad.

Si ilmahaagu u dareemo caafimaad waxaa muhiim ah in la raaco talooyinka hoos ku qoran, xitaa haddii ilmuhu qaatay talaalka.

Ilmahaaga dhallaanka ah ka difaac cudur ku faafa

- La kulan oo keliya dadka caafimaadka qaba.
- Dhammaan dadka la kulmaya ilmaha waa in ay gacmaha ku dhaqaan saabuun iyo biyo ama isticmaalaan dareeraha gacmaha ee infakshanyada ka hortaga.
- Ka taxaddar in ilmuhu wakhti dheer joogo meelo dhisme gudihis ah ay dad badan ku kulmayaan inta lagu jiro xilliga deyrta iyo jiilaalka.
- Ilmahaaga talaal oo sii talaalyada ay idinku casuumayaan XCC.

Miyaad haysaa su'aalo?

Waxaa mar walba lagugu soo dhaweynayaa inaad la xiriiro xarunta caafimaadka carruurta, XCC, haddii aad hayso su'aalo. Waxaad xitaa wixii dheeraad ah ka akhriin kartaa halkan:

- [1177.se](https://www.folkhalsomyndigheten.se)